# Doorashooyin Qabo

**Haddii aad rabto in aad samaysato mise ku biirto urur, mise caddeyso urur jira, waxaad xarayn kartaa codsi doorasho. Dib uga eeg tallaabooyinka xaraynta codsiga halkan. Fadlan la xiriir sarkaalka macluumaadka jooga Xafiiska Gobolka** kuugu dhow **si laguu caawiyo.**

Si loo bilaabo hannaanka doorashada, codsi iyo dukumeenti la xiriira waa in la xareeyaa, iyadoo si elektaroonig ah loo doorbidayo, iyadoo Xafiiska Gobolka NLRB ee kuugu dhow uu tusayo taageerada codsiga ugu yaraan 30% shaqaalaha. Wakiillada NLRB ayaa markaa baari doona si ay u hubiyaan in Guddiga awood u leeyahay, ururka shaqaaluhuna u qalmo, oo aysan jirin qandaraasyo shaqo oo jira mise doorashooyin dhawaan dhacay oo diidaya doorasho. Wax yar kadib marka codsiga la xareeyo, shaqa bixiyaha ayaa looga baahanyahay inuu ku dhajiyo Ogeysiinta Codsiga Doorashada meelo muuqda, oo ay ku jiraan dhammaan meelaha ogeysiisyada shaqaalaha lagu dhajiyo. Haddii shaqa bixiyaha si caadi ah ula xiriiro shaqaalaha ku jira unugga la codsaday iyadoo loo marayo hab elektaroonig ah, shaqa bixiyaha waa inuu sidoo kale u qaybiyaa shaqaalahaas Ogeysiiska Codsiga Doorashada si elektaroonig ah.

Wakiillada NLRB waxay raadin doonaan heshiis doorasho oo u dhexeeya shaqa bixiyaha, ururka, iyo dhinacyada kale ee dajinaya taariikhda, wakhtiga, iyo goobta codaynta, luqadda(yada) cod bixinta, qaybta ku haboon, iyo habka lagu go'aamiyo qofka u qalma inuu codeeyo. Marka heshiis la gaaro, dhinacyadu waxay u oggolaanayaan Agaasimaha Gobolka NLRB inuu qabto doorashada. Haddii aan heshiis la gaarin, Agaasimaha Gobolka wuxuu qabanayaa dhagaysi kadibna wuxuu amri karaa doorasho isagoo dejin kara shuruudaha si waafaqsan xeerarka Guddiga iyo go'aannadooda.

Sida caadiga ah, doorashooyinka waxaa la qabtaa taariikhda ugu horraysa ee la hirgelin karo kadib amarka agaasimaha mise oggolaanshaha, taas oo ku kala duwanaan doonta kiisba kiis. Haseyeeshee, doorashada dib ayaa loo dhigi karaa haddii koox codsato in la joojiyo codsiga iyadoo lagu saleynayo eedeymaha lagu eedeynayo habdhaqanka faragalinaya doorashada xorta ah ee shaqaalaha, sida hanjabaad shaqo mise dheefo mise urur shaqaale, bixinta dallacsiin, mushaar kordhin, mise dheefo kale si ay saameyn ugu yeeshaan codka. Marka doorashada la qorsheeyo, Shaqo bixiyaha ayaa looga baahanyahay inuu dhajiyo Ogeysiinta Doorashada kaasoo badali doona Ogeysiiska Codsiga Doorashada ee hore loo dhajiyay.

Marka ururka shaqaaluhu uu jiro, ururka tartamaya waxa uu xarayn karaa codsi doorasho haddii qandaraaska shaqadu uu dhacay mise uu dhacayo, waxayna tusi karaan xiisaha ugu yaraan 30% shaqaalaha. Tani waxay caadi ahaan natiijadeedu noqonaysaa doorasho saddex-geesood ah, iyadoo doorashooyinku ay yihiin ururka shaqaalaha ee xilka haya, ta loolanka leh, iyo "midna." Haddii saddexdaas midkoodna uusan helin codka aqlabiyadda, waxaa la qaban doonaa wareeg labaad oo u dhexeeya labada heshay codka ugu badan.

Doorashooyinka lagu shahaadeynayo mise aan lagu shahaadeyneyn ururka shaqaalaha wakiilka gorgortanka ee unuga shaqaalaha waxa lagu go'aamiyaa aqlabiyadda codadka la riday. Goob joogayaasha ka socda dhammaan dhinacyada ayaa dooran kara inay goobjoog ka noqdaan marka la tirinayo codadka. Koox kasta waxa uu u gudbin karaa diidmo iyo soo jeedin caddayn ah oo

lagu taageerayo diidmada Agaasimaha Gobolka ee ku habboon 7 maalmood gudahood tirinta codadka. Ta kale, marka laga reebo meelaha ay dhinacyadu ugu heshiiyaan si kale, go'aanka Agaasimaha Gobolka ee diidmada waxaa suurtagal ah in rafcaan looga dacwoodo Guddiga Washington. Natiijooyinka doorashada ayaa la iska fogeeyaa haddii hab dhaqanka shaqo bixiyaha mise ururka shaqaaluhu abuuro jawi jahawareer mise cabsi laga qabo aargoosi ay faragaliyaan xorriyadda doorashada ee shaqaalaha.

Haddii kale, urur shaqaale ee hela codadka inta badan la riday waxaa loo cadeeynayaa inuu yahay wakiilka gorgortanka shaqaalaha waxana uu xaq u leeyahay shaqo bixiyaha inuu u aqoonsado wakiilka gorgortanka gaarka ah ee unuga shaqaalaha. Fashilka in lala gorgortamo ururka waqtigan waa dhaqan shaqo oo aan cadaalad ahayn.

Guji jaantusyada iyo xogta kusaabsan doorashooyinka matalaadda.

# Wado ka duwan oo loo maro matalaadda ururka

Marka lagu daro doorashooyinka ay qabato NLRB, sharciga fadaraalka wuxuu siinayaa shaqaalaha wado labaad oo ay ku doortaan wakiil: Waxaa suurtagal ah inay ku qanciyaan shaqo bixiyaha inuu si mutadawacnimo ah u aqoonsado urur shaqaale kadib markay taageero aqlabiyad ah ku muujiyaan kaararka oggolaanshaha oo saxeexan mise siyaabo kale. Heshiisyadan waxaa loo sameeyay si ka baxsan nidaamka NLRB. Haddii ururka si mutadawacnimo ah loo aqoonsado, xaaladdiisa wakiil gorgortanka laguma doodi karo muddada macquulka ah ee gorgortanka, kaas oo Guddigu ku qeexay wax aan ka yarayn lix bilood (oo aan ka badnayn hal sano) kadib fadhiga gorgortanka ugu horreeya ee dhinacyada. Si kale haddii loo dhiggo, muddadaas macquulka ah, shaqo bixiyaha kama noqon karo aqoonsiga, guddiguna ma baaraandagi doono codsiga doorashada si meesha looga saaro ururka mise loogu badalo urur kale. Haseyeeshee, si loo codsado bar-codsiga doorashada, loo shaqeeyaha iyo/ama ururka shaqaaluhu waa inay marka hore ogeysiiyaan Xafiiska Gobolka ee Guddiga in la siiyay aqoonsi ikhtiyaari ah; loo shaqeeyaha waa in uu dhajiyaa oo u qaybiyaa shaqaalaha ogeysiis ogeysiiya shaqaalaha in aqoonsiga la siiyay iyo in ay xaq u leeyihiin in ay xareeyaan codsi muddada 45-maalmood laga bilaabo taariikhda ogeysiiska la dhajiyay; mana jirto codsi si habboon loo taageeray gudaha 45-kaas maalmood.

# Xafiiska Racfaanka Wakiillada

Dibu eegista go'aamada doorashada, oo ay kujiraan tuurista codsiyada iyo go'aamada doorashada kahor ee Agaasimayaasha Gobolka, waxaa gacanta ku haya Xafiiska Racfaanka Wakiillada ee Washington, D.C. Codsiyada dibu eegista ayaa la xereyn karaa waqti kasta ilaa 14 maalmood kadib shahaadeynta wakiillada mise natiijada doorashada mise tuurista codsiga. Kiis kasta waxaa loo xilsaaraa qareen iyo kormeere si ay u eegaan kiiska, oo dabadeed loo soo bandhigo Guddiga. Waxaa suurtagal ah in guddigu ay diidaan dibu eegista mise ay bixiyaan dibu eegista go'aanka. Haddii Guddigu oggolaado dibu eegista, dhinacyadu waxay xareyn karaan warbixinno kooban oo dheeraad ah oo kusaabsan dibu eegista.

**Liiska dhammaan doorashooyinka NLRB** bishiiba, fadlan eeg Warbixinteenna Doorashada.

**Macluumaad dheeraad ah** mise si aad u hesho caawimaad xeraynta codsiga, fadlan la xiriir sarkaalka macluumaadka jooga Xafiiska kuugu dhow ee NLRP.